# BMP-yada NABAAD GUURKA IYO JAAYGA

***Ma ogtahay***

in biyaha maraaya nidaamka daadku ay toos u galaan wabiyadeena, balida, harooyinka, iyo bad waynta - ayagoo sida wasaqda soo raacda?

**Farsamooyinka Ugu Fiican ee Maaraynta (Best Management Practices, BMP-yada ayaa)** gacan ka gaysta difaaca tayada biyaha ayagoo yaraynaaya ama kahortagaaya ilaha wasaqda ee dhammaan Ismaamulka San Diego, taasoo ugu danbayn yaraynaysa cadadka wasaqda gasha biyaheena.

Jaayga ayaa ah wasaqda ugu badan ee gasha biyaheena wuxuuna la socdaa ciida daadku soo qaado. **BMP-yada ayay qasab tahay in la dhaqan gasho markasta oo shaqooyinka dhismuhu ay jebiyaan ama soo qufaan ciida si looga hortago in daadku qaado loona xakameeyo in jaaygu ka baxo meesha.** Waa muhiim in BMP-yada xakamayn nabaad guurka ciida iyo jaayga si sax ah **loo dhaqan gashaa loona joogteeyaa si ay qaab sax ah ugu shaqeeyaan.**

## Hoos waxaad ka helaysaa tusaaleyaasha BMP-yada **gacanta ka gaysanaaya kahortaga in jaaygu ka baxo goobta dhismaha:**




(Xaashida Xogta ee SC-6 Caltrans si aad u hesho xog dheeraad ah)

**MAXAY QABATAA:** Waxay leexshaan biyaha socda, waxay yareeyaan xawaaraha, waxayna ka reebaan jaayga biyaha daadka.

**XAGEE LOO ISTICMAALAA:** Dagaan-daga ciida daadku qaado, cirifyada dagaan-daga, meelaha daadka iyo kanaalada biyuhu maraan, meelaha la maro, iyo goobaha mashruuc ka socdo.

**SIDA LOO DHIGO:** Jawaannada waa in si saf dheer ah loo dhigaa ayadoon dhexdeedo meel laga banayn. Waxaa laga dhigi karaa lakabku isa saaran ama waa la isdulsaaraa marka loo baahdo.

**DIGNIINTA ILAALINTA:** Waa in la ilaaliyo lana badelo, maadaama jawaannada xumaada ama dilaaca ay daadin karana jaayga.




(Xaashida Xogta ee SC-1 Caltrans si aad u hesho xog dheeraad ah)

**MAXAY QABATAA:** Waxay leexshaan biyaha socda, waxay yareeyaan xawaaraha, waxayna ka reebaan jaayga biyaha daadka.

**XAGEE LOO ISTICMAALAA:** Meelaha siman, dagaan-daga ciida daadku qaado, cirifyada dagaan-daga, meelaha daadka iyo kanaalada biyuhu maraan, iyo goobaha mashruuc ka socdo.

**SIDA LOO RAKIBO:** Salka hoose ee ardaaga waa in la aasaa 12 inji tiirarka adkaynaayana ay isku jiraan wax ka yar 6 fiid.

**DIGNIINTA ILAALINTA:** Waa in la ilaaliyo lana badello maadaama dusha jawaanku aysan muddo dheer noolaan karin.




*(Xaashida Xogta TC-1 Caltrans si aad u hesho xog dheeraad ah)*

**MAXAY QABATAA:** Wuxuu yareeyaa dhiiqada iyo wasaqda gaaraysa wadooyinka dadwaynaha ee ay qaadana gaariyaasha aaga dhismaha.

**XAGEE LOO ISTICMAALAA:** Albaab kasta oo gaarigu ka galo kana baxo aaga dhismaha. Tirada meelaha gelitaanka/ bixitaanka waa in la xadidaada lana xanibaa si looga hortago in biyuhu ku qulqulaan.

**SIDA LOO RAKIBO:** Godka jaayga oo 12 inji hoos u qodan, ayadoo dhagaxyo yaala inta u dhexaysa 3-6 inji balac, waa in la saaraa aaga. Dhagaxaan qaruurax ah ayaa sidoo kale la adeegsan karaa si taayirada gaariga looga daadsho wasaqda.

**DIGNIINTA ILAALINTA:** Waa in la nadiifiyaa si ay waxtar u noqdaan. Jaay kasta oo gaara wadooyinka waa in la xaaqaa.




*(Xaashida Xogta SC-5 Caltrans si aad u hesho xog dheeraad ah)*

**MAXAY QABATAA:** Waxay leexshaan biyaha socda, waxay yareeyaan xawaaraha, waxayna ka reebaan jaayga biyaha daadka.

**XAGEE LOO ISTICMAALAA:** Taagaga iyo/ama godadka ciida la qufay, iyo aaga meesha dhismuhu ka socdo.

**SIDA LOO RAKIBO:** Duubabka waa in la dhigaa meel la siman jooga taaga, dhufays yar loo sameeyaa, lana isdul saaraa 4 fiid kasta. Haddii la adeegsanaayo duubab badan, waa in la labo jibaaraa.

**DIGNIINTA ILAALINTA:** Waa in la ilaaliyaa lana badelaa marka ay xumaadaan.

## Hoos waxaad ka helaysaa BMP-yada kaa caawinaaya **kahortaga nabaad guurka goobta dhismaha:**




**MAXAY QABATAA:** Daboolka ugu danbeeya, sida beeraha, lakabyada difaaca ciida, dhagaxa, ama qaruuraxa ayaa ka difaacaaya in ciida la qufay daadku qaado.

**XAGEE LOO ISTICMAALAA:** Dhammaan mashruucyada qufaaya ciida ayaa laga doonayaa daboolka kama danbaysta ah marka shaqada dhismaha la dhameeyo. Tusaaleyaasha qaar waxaa kamid ah, taagaga la qufay, ciida u dhow dhismeyaasha, iyo dhufaysyada ciida lagu ceshay.

**SIDA LOO RAKIBO:** Haddii la isticmaalaayo beeraha waa qasab in si siman loo qaybiyo looguna daboolo ugu yaraan 70% aaga la dhigay. Taas badelkeed, aaga loo qaybiyay ayaa 100% lagu dabooli karaa alaabo hoose sida lakabyada ciida difaaca, dhagaxa, ama qaruuraxa.

**DIGNIINTA ILAALINTA:** Alaabaha la hoos gasho ayay u badan tahay inaysan dayactir badan rabin, inkastoo beeruhu u baahan karaan waraabin si qaab sax ah loogu maamulo.

## DIYAAR AYAAN U NAHAY INAAN KU CAAWINO

Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah oo ku saabsan BMP-yada fadlan la xariir Adeegyada Naqshada iyo Dhismaha ood ka helayso **www.sandiegocounty.gov/content/sdc/pds/bldg.html**

Diseembar 2019